# Daryeelada Caafimaad ee Dadka Aan Muwaadiniinta Ahayn

**Health Care for Noncitizens**

## Ma u heli karaa daryeel xaalad caafimaad haddii aanan ahayn muwaadin Mareykan (US) ah?

Gobolka Minnesota waxaa ka jira 3 nooc oo caymiska caafimaadka ah oo loogu tala galay dadka dakhligoodu hooseeyo. Hadii aadan haysan dhalashada Maraykanka waxaa laga yaabaa inaad caawimo ka heshid mid ka mid ah barnaamijyadan, laakiin waxay ku xiran tahay inta dakhligaaga yahay, sharciga aad wadanka ku joogtid nooca uu yahay iyo taariikhda sharciga lagu siiyay.

Barnaamijyadani waxay kala yihiin:

1. Caymiska caafimaadka gobolku bixiyo (MA)
2. Caymiska caafimaadka ee gobolku qayb kabo(MNCare)
3. Caymiska caafimaadka ee gargaar degdeg ahaan loo bixiyo (EMA)

## 1. Caymiska Caafimaadka ee Gobolku bixiyo (MA)

Caymiska koobaad ee gobolka MN waa caymiska gobolku bixiyo ee MA. Caymiska MA wuxuu bixiyaa inta badan adeegyada caafimaad ee muhiimka ah. Hadaba si'aad u heshid caymiska MA, waa inaad tahay qof **dakhligiisu hooseeyo** , waa inaad buuxisid **shuruudaha lagu helayo,** iyo inaad leedahay sharci buuxinaya **shuruudaha laanta socdaalka**



### Shuruudaha:

Hadaba si'aad u heshid caymiska MA, ugu yaraan waa inaad buuxisid mid ka mid ah shuruudahan soo socda:

- Hadii gabadhu uurleedahay
- Hadii aad ka mid tahay qoys qaata caydh MFIP ama haysta caruur aan qaan gaadhin
- Hadii aad ka yar tahay 21 jir
- Hadii aad tahay naafo ay aqoonsatay hay'adda sooshal sakuuratiga ama gobolku.
- Hadii aad jirtid 65 sano ama ka wayn tahay
- Hadii aad jirtid 21 sano ama aad ka wayn tahay isla markaana ayna wax caruur ah oon qaan gaadhin ayna guriga kugula noolayn

Dakhliga lagaa rabo inta uu noqonayaa waxay ku xiran tahay,da'da aad jirtid, inaad caruur haysatid iyo inkale,hadii aad naafo tahay,ama in gabadhu uurleedahay. Keliya dadka waayeelka ah ama "naafada ah" ayay shuruudi ku xiran tahay inta ay le'egtahay hantida guud ee ay haystaan si'ay u helaan MA.

Hadii aadan buuxin mid ka mid ah shuruudahaas siday u badan tahay laguma siinayo caymiska MA.

Hadii aad buuxisid mid ka mid ah shuruudaha kor ku qoran , sida caadiga ah waxaa kale ood **“xaq u leedahay”** wax kasta oo ay helaan dadka aan **dhalashada haysan** iyadoo la raacayo sharciga dawladda dhexe.

Waad buuxisay **“shuruudihii”** caymiska lagu siinayay dadka aan dhalashada haysan hadii:

- Hadii aad haysatid deganaanshaha rasmiga ah (**green card).** (Taa macnaheedu waa waxaad haysataa shrciga deganaanshah rasmiga ah ee dalka ama loo soo gaabiyo( LPR).
- Ama aad tahay qof **magangelyo la siiyay.**
- Ama **Xabsi maraykanka gudihiisa ah** lagaa sii daayay halkii sanana uuna kaa dhamaanin.
- Ama si **ku meel gaadh ah loo hakiyay masaafurintaada** ama **si buuxda loo joojiyay masaafurintaada**.
- Ama lagu siiyay nooca fiisada loo yaqaan **T-visa** ee la siiyo dadkaay dhibta xun ay u gaysteen dadka bani’aadamka ka ganacsadaa.
- Ama sharci lagu siiyay ka dib marka qofkii ku keenay kugu dhibay ama **kaala noqday sharciga**.
- Aad tahay **qaxooti** ama laguula dhaqmo siddii **qaxooti** oo kale. Tan macnaheedu waa:
  - Muhaajir “Mareykan-Aasiyaan ah” kaa oo aabihii uu ahaa muwaadin Mareykan ah (US) oo ku noolaa Bariga-Koonfureed ee Aasiya xilligii sannadihii Dagaalkii Fiitnaam.
  - Soo gale Kuubaan ama Haytiyaan ah
  - Muhaajir Gaarka ah ee Ciraaqi ama Afgaanistaanka ah
  - Dadkii uu milaratiga Mareykanku (US) ka soo daad-gureeyey Afganistaan mudaddii u dhaxeysay 7/31/21 iyo 9/30/22 (ilaa iyo xabsi dowligu ka dhamaanayo)
  - Ehel dhow la ah dadkii laga soo daad-gureeyey Afganistaan ee kor lagu xusay oo la saamaxay ka dib 9/30/22
  - Dadka laga keenay Yukreeyn lana saamaxay mudaddii u dhaxeeysay 2/24/22 ilaa iyo 9/30/23
  - Muwaadinka “Heshiiska Xulafada Xorta ah” “(Compacts of Free Association).” Taa macnaheedu waxa aad u dhalatay wadamada Palau, Micronesia, ama Marshall Islands.

## Whakhtiga 5-Sano ee sugi taanka ah

Xataa hadaad tahay qof “shuruudihii buuxiyay” oo aan dhalashada haysan, **Waxaa laga yaabaa inaad sugtid 5 sano** (oo laga soo tiranayo taariikhdii lagu aqbalay eed “shuruudaha buuxisay”) si’aad u heshid camiska MA. **MA SUGAYSID** 5 sano hadii aad buuxisid mid ka mid ah shuruudaha soo socda:

- hadii aad qaxooti tahay
- hadii aad tahay qof magangelyo la siiyay
- hadii aad tahay qof laga joojiyay masaafurin la masaafurin lahaa
- hadii aad tahay qof ka tirsanaan jiray ama hadaba ka tirsan ciidamada Maraykanka

- ama aad tahay xaaska/ninka ama ilmo uu dhalay qof ka tirsanaan jiray ama hadaba ka tirsan ciidamada Maraykanka.
- Hadii aad tahay dadka wadamada Palau, Micronesia, ama the Marshall Islands
- Ka soo jeeda Ukreeyn loona ogolaaday saamaxaad bini'aadanimo inuu wadanka ku joogi karo ama ehel hoose la ah qof saamaxaad bini'aadanimo wadanka loogu ogolaaday mudadooyinkii u dhaxeeyey 2/4/22 iyo 9/29/23 U
- Qof uu milaratiga Mareykanku (US) ka soo daad-gureeyey Afganistaan mudaddii u dhaxeysay 7/31/21 iyo 9/30/22 ama qaraabo hoose la ah qofka la soo daad-gureeyey oo la sharci la siiyey ka dib 9/30/22



## Maxaa dhacaya haduu qof kale wadanka ikeenay?

Intooda badan dadka Maraykanka yimaada waxaa keena dad qaraabadooda ah oo Maraykanka gudihiisa ku nool. Dadka qaraabada ah ee dadkooda keenaa waa kuwo haysta dhalashada Maraykan ama haysta sharciga deganaanshaha rasmiga ah ee LPR. Qofka wadanka ku keenay wuxuu ogolaaday inuu mas'uuliyadaada qaado marka aad maraykanka soo gashid, sidoo kale wuxuu laanta socdaalka ee USCIS u balan qaaaday inuu xaga dhaqaalaha kaa caawin doono, hadii ay dhaqaalo xumo kugu dhacdo.

Hadii aad Maraykanka soo gashay wixii ka dambeeyay bishii December 19, 1997 oo ay qaraabadaadu ku keentay, dawladu waxay u tixgelinaysaa in dakhligaa iyo hantida qofka ku keenay iyo lamaanihiisu inay yihiin dakhli iyo hanti aad adigu leedahay waana laguu xisaabinayaa. Hadii dad ka badan hal kafiil uu wadanka ku keenay, kafiilka kale dakhligiisa iyo hantidiisa waxaa loo xisaabin dakhli ahaan. Dakhliga iyo hantida kafiilka wadanka ku keenay waa la xisaabin ilaa iyo inta aad ka noqonayso muwaadin Mareykan ah (U.S.), kafiilka ku keenay uu ka dhimanayo ama uu si rasmi ah uga tagayo Mareykanka (U.S.), ama aad adigu shaqeysay 10 sanno laagana jaray canshuurta la yiraa (FICA) lacagtaada shaqada. Waxaa dhici karta siddoo kale in laguu xisaabiyo shaqada xilahaagu ama waalidkaa uu qabtay intii aadan qaan gaarin.

Xisaabinta kafiilka wadanka ku keenay dakhligiisa iyo hantidiisa waxaa dhici karta inay kaa kor mariso xadka dakhliga iyo hantida ee xaqqa loo yeesho barnaamijka MA. Waxaa jira nidaamyo gaar oo gobolku leeyahay oo kolkaa uusan gobolku xisaabin kafiilka wadanka ku keenay dakhligiisa iyo hantidiisa muddo 12 bilood ah hadii aad tahay dhibane tacadi loogu geystay qoyska dhexdiisa aad u baahan tahay daryeel caafimaad. Waa khasab inaad cadeyso xiriir weyn oo ka dhexeeya tacadiga laguu geystay iyo baahidaada aad u qabto daryeel caafimaad. Haddii uu dakhligaagu –iyadoon lagu darin dakhliga kafiilka wadanka ku keenay – uu ka hooseeya habraacyada lagu aqoonsado saboolnimada, waxaa dhici karta inaad hesho kaarka MA.



**Fiiro Gaar ah:** Dakhliga qofka ku keenay **LOOMA XISAABINAYO Dumarka uurka leh** iyo **Caruurta**. Taa waxaa ku jirta 12-bilood ee ka dambaysa mudadda dhalmada ee dadka uurka leh.

**Fiiro gaara**: Dakhliga iyo hantida kafiilka wadanka ku keenay waa la xisaabiyaa kolka MA la bixinayo laakiin lama xisaabiyo kolka la bixinayo kaarka MNCare. Sidaa darteed waxaa laga yaabaa in dakhligaagu ka bato intii laguugu ogolaan lahaa caymiskaMA, laakiin uu ka yaraado intii aad ku heli lahayd caymiska MNCare. Hadaba si dhibtan lagaaga caawiyo,gobolku wuxuu sameeyay barnaamij lagugu"bad baadinayo".Barnaamijkani wuxuu ogolaanayaa inaad labada caymis midkood heshid MA ama MNCare, waxayna ku xidhan tahay inta lagu qiimeeyo dakhligaaga sanadku inta uu noqon doono. Akhri macluumaadka ku saabsan barnaamijka *Badbaadada ee ku qoran qaybta ka hadlaysa* MNCare hoosteeda.

## Waxaa jira 2 Caymis oo gaar ah oo MA leeyahay:

- **Nooc MA ah oo ay bixiso hay'adda daryeesha dhibanayaasha Jidh dilka loo gaystay**

Minnesota waxay leedahay miisaaniyad gooni ah oo loogu talo galay in lagu bixiyo caymis khaas ah oo MA leeyahay. Caymiskan waxaa loogu talo galay keliya dadka adeega ka hela hay'adda daryeesha dhibanayaasha jidh dilka loo gaystay ( CVT) ama barnaamij la mid ah.halkan ka gal barta internetka ee hay'adda daryeesha dhibanayaasha jidh dilka loo gaystay CVT's) bogga www.cvt.org.

Hadii aad kaalmo ama adeeg ka heshid hay'adda CVT ama barnaamij la mid ah , waxaad buuxisay shuruudihii lagu helayay caymiskan khaaska ee MA bixiyo.Uma baahnid inaad buuxisid "shuruudaha" loogu ogolaado dadka aan dhalashada haysan. Xataa uma baahnid inaad buuxisid shuruucda caymiska MA lagu helo. Sidoo kale muhiim ma aha inuu dakhligaagu hooseeyo iyo inta ay le'egtahay hantida aad haysataa!

- **Caymiska MA ee Dumarka uurka leh iyo Caruurta – Barnaamijka Caymiska Caafimaadka ee Caruurta(CHIP)**

Caruurta sida **sharciga** ah ugu nool wadanka Maraykanka waxay xaq u leeyihiin Caymiska MA. Caruurta caymiskan la siinayo waxaa ka mid ah kuwa loo ogolaaday inay si ku meel gaadh ah wadanka ugu noolaadaan(TPS) kuwaas oo dalbaday sharciga iyo magangelyo laakiin aan weli la aqbalin,iwm.Uma baahna inay buuxiyaan "shuruudaha" loogu ogolaado dadka aan dhalashada haysan. Caymiska MA ee la siiyo caruurta aan "shuruudaha"buuxin waxaa maal geliya Barnaamijka caymiska caafimaadka caruurta ee CHIP.




**Hadii aad uur leedahay**, waxaad heli kartaa caymiska MA mudada aad **uurka leedahay oo dhan** iyo **mudo 12 bilood ah** umushaada ka dib ah. In Caymiskan lagu siiyaa kuma xirna nooca uu yahay sharciga aad wadanka ku joogtaa. Caymiskan MA waa lagu siinayaa xataa hadii aad wadanka sharci daro ku joogtid. Kharashka ku baxaya caymiska MA waxaa bixinaya barnaamijka caymiska caafimaadka caruurta ee CHIP.

Eeg warqadayada xogta aruursan ee *Kaarka Caafimaadka iyo Uurka*.

## 2. Caymiska Caafimaadka ee (MNCare)

Caymiska caafimaadka ee labaad ee gobolka MN leeyahay waa nooca dawladdu qayb kaa kabayso oo la yiraa (MNCare). Hadii aadan buuxin shuruudihii MA lagu helo oo dakhligaagu aad u sareeyo waxaad dalban kartaa caymiska MNCare. Caymiska caafimaadka ee MNCare bil walba waa inaad lacag bixisid. Caymiska MNCare lacagta aad bixinaysaa waxay ku xidhan tahya hadba inta dakhligaagu yahay. Sidoo kale MNCare waad heli kartaa hadii aadan buuxin shuruudihii MA lagu helayay, iyo hadii aad weli ku jirtid mudadii 5-sano ee loogu talo galay in caymiska MA la sugo ama aad tahay qof aan "shuruudihii buuxin" oo aan dhalashada wadanka haysan. Si ka duwan MA, caymiska MNCare ma bixiyo adeega caafimaad ee gurigaa laguugu imanayo gaadiidka u qaadida balamaha caafimaadka  ee aan degdeg ahayn, maareynta caafimaadka madaxa ama adeegyada xasalinta guryaha.

### Ma heli karaa Caymiska MNCare?



Waad heli kartaa caymiska MNCare hadii aad **sharci sax ah ku leedahay** wadanka Maraykanka si rasmi ahna ugu nooshahay wadanka gudihiisa. Waxaa laguu tixgelinayaa inaad shari wadanka ku joogtid hadii xaaladaada sharci tahay mid ka mid xaaladahan soo socda ama kuwo la mid ah:


- Qof la siiyay sharci ku meel gaadh ah oo uu wadanka ku joogo
- Qof weli ka war sugaya magangelyo uu codsaday ama si ku meel gaadh ah wadanka ku jooga ama laga joojiyay masaafurin haddii aad haysato warqad shaqo. Ama aad ka yar tahay 14 sanno jir, codsi magangeliyo uu kuu xaraysnaa ugu yaraan 6 bilood.
- Qof wareegto madaxweynuhu soo saaray ku jooga,ama laanta socdaalku ka joojisay masaafurin,ama masaafurin sugaya
- Qof xaalad bani'aadminimo darteed lagu sii daayay
- Qof sharci dalbaday oo sugaya jawaabtii laanta socdaalka
- Qof loo ogolaaday inuu si ku meel gaadh ah wadanka ugu noolaado(TPS)
- Qof haysta nooca fiisada ee (U-visa) fiisadan waxaa la siiyaa dadka iyagoo Maraykanka ku nool dhibaato jidh dil iyo bahdil ah loo gaystay
- Qof isagoo caruur ah wadanka sharci daro lagu keenay oo loo ogolaaday inuu si ku meel gaadh ah wadanka ugu noolaado (DACA).

### Caymiska MNCare miyuu leeyahay sharci u degan oo ku saabsan dakhliga qofka ku keenay iyo mudada sugitaanka?

Wuu ka duwan yahay MA, waayo caymiska MNCare ma kuu **xisaabinayo** dakhliga qofka ku keenay. Sidoo kale, **ma jirto** wakhti 5-sano oo aad sugaysid MNCare.

### Barnaamijka Caymiska caafimaadee badbaadada

Sida badan, si qofku si'uu u buuxiyo shuruuda lagu helayo caymiska MNCare dadka aan dhalashada Maraykanka haysan ee ku nool wadanka Maraykanka gudihiisa waa in dakhligoodu yahay inta u dhaxaysa 137% ilaa 200% Iyadoo la raacayo sharciga fakhriga ee ay dawladda dhexe u dejisay fakhriga(FPG). Sababtoo ah caymiska MA wuxuu xisaabinayaa dakhliga qofka ku keenay laakii caymiska MNCare kuuma xisaabinayo, qofka aan dhalashada haysan waxaa laga yaabaa in dakhligiisu ka bato kii MA lagu helayay isla markaana ka hooseeyo kii uu ku heli lahaa MNCare. Inta uu noqonayo heerka dakhliga lagaa rabaa inuu (income levels) noqdaa waxay ku xiran tahay inta ay tahay tirada dadka gurigaaga ku nooli. Sababtaa uu qofku labadii dhinacba seegayo darteed , gobolka wuxuu u sameeyay dadka xaaladani soo wajahdo barnaamij lagu badbaadinayo oo qofku helaya caymiska MA ama MNCare, waxayna ku xiran tahay inta lagu qiimayo dakhligooda sanadka.



## 3. Caymiska Cafimaad ee Gargaarka Degdega ah (EMA)

Caymiska EMA waa barnaamijka caymiska caafimaad ee sedexaad ee gobolka MN leeyahay. Caymiska EMA waad heli kartaa, **nooc kasta oo sharciga aad haystaa yahayba iyo hadii aadan wax sharci ah lahaynba** laakiin, caymiska EMA adeegyada uu bixiyaa way kooban yihiin.

### Ma heli karaa caymiska EMA?

Si laguu siiyo caymiska EMA, waa inaad buuxisaa ugu yaraan shuruud ka mid ah shuruudahan soo socda:

- inaad uur leedahay,
- a inaad ilmo yar tahay ama aad ku nooshahay guri ay joogaan ilmo aan qaan gaadhin
- naafonimo la aqoonsan yahay
- inaad tahay 65 jir ama aad ka wayn Tahay
- inaad tahay 21 jir ama aad ka wayn tahay gurigana ayna kugula noolayn ilmo aan qaan gaadhin

Waxaa kaloo dhici karta inaad xaq u yeelato kaarka EMA haddii:

- aad hesho Adeegyada Waayeelka loo Saamaxo
- aad ku jirto rug lagu hayo dad haynta u baahan ama madaxa ka xanuunsan
- lagaa soo daayey cisbitaal ama Rugaha Daryeelka Degdeg ah (ER) ayna kula soo darsi doonto xaalad caafimaad oo degdeg ah 48 saac ee soo socota hadii aadan helin adeegyo.

## Caymiska EMA muxuu bixiyaa?

Caymiska EMA wuxuu bixiyaa **adeega gargaarka degdega ah ee caafimaad**. Si laguu siiyo caymiska EMA, waa inay kula soo deristo xaalad caafimaad oo khatar ahi ama ay jiraan xanuuno aad qabtid. Si laguu siiyo caymiskan waa in xanuunka ku haya ama khatarta caafimaad ee ku soo wajahday ay yihiin kuwo hadii aan lagaa dawayn uu caafimaadkaaga iyo xubnaha jirkaagu ay khatar gelayaan.

Hadii ay xaalad caafimaad oo degdeg ahi kugu timaado,caymiska EMA wuu bixinayaa kharashka dawayntaada. Sida caadiga ah waxay bixiyaan dawaynta lagu sameeyo qolka gargaarka degdega ah ama gaadhiga ambalaasta dhexdiisa. Sidoo kale caymiska EMA way bixinayaa kharashka hadii isbitaal lagu seexiyo ama aad dhowaan ka soo baxday isbitaal welina aad u baahan tahay inaad dhakhtar kale aragtid.



Caymiska EMA waad heli kartaa hadii xaga wadnaha ama neefsashada aad dhib ka qabtid **hadii**, aan mudo 2maalmood guduhooda lagaa dawayna aad dhib culus la kulmaysid.

Inta badan, caymiska EMA **ma bixiyo** daryeel caafimaad oo ku saabsan cuduro markaa la qabo. Caymiska EMA **waxa uu bixiyaa** adeegyada daryeelada guriga lagu helo, daryeelada caafimaadka madaxa, iyo daryeelo kale oo caafimaad oo la xiriira dhibaatooyin xagga caafimaadka ah oo aan loo tixgelin inay yihiin kuwa "degdeg ah."

Laakiin caymiska EMA waa uu bixiyaa daryeelada caafimaad ee qaar ka mid ah **cuduradda mudadda dheer** la qabo sidda cudurka **kansarka** iyo cudurradda kalyaha. Caymiska EMA waxa uu bixin karaa kharashka kalyo sifanta, kalyo gelinta iyo adeegyo kale oo la xiriira kalyo gelinta. Caymiska EMA **ma bixiyo** gelinta jirka xubno kale.

Si'aad u heshi macluumaad dheeraad ah oo la xiriira EMA, booqo oo akhri xogta urursan ee [Daryeelka Caafimaadka Degdegga ah](#).

***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2024 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**